SUGITAANKA DHALMADA U HOREYSA

MASHRUUCA WAXBARASHADA DADWEYNAHA EE
WASAARADDA WAXBARASHADA & BARBAARINTA

SUGITAANKA DHALMADA U HOREYSA

MAXAMED IYO FAADUMO AYAA ISGUURSADEY AROOSKOODII KA DIB AYAY LABADUBA KU SOO NOQDEEN GURIGA QOYSKII MAXAMED AABIHII.

FAADUMO WAXAY AAD UGU WERWERSANAYD WAXAY KALA KULMI DOONTO MAXAMED HOOYADII.

"TOLOW MAXAY ODHAN ! MA HESHIN DONNTAAN ?"

MAXAMED HOOYADII WAA QOF WANAGSAN, FAADUMOSE MAY OGEYN. MADIINA OO AH MAXAMED HOOYADII WAXAY U ARAGTAY INAY TAHAY FAADUMO INAN XISHOOD BADAN OO NAXARIIS LEH.

INTAY ISLAANTII SHAAH SOO KARISAY BAY SOO AG FADHIISATAY FAADUMO OO AY LA SHEEKAYSATAY.

FAADUMO SU'AALO BADAN AYEY WEYDIISEY SODOHDEED SI AY U OGAATO WAXA UU NINKEEDU JECELYAHAY. MADIINA WAXAY KU DHEERATAY SHEEKADII WIILKEEDA OO U AHAA CURADKII. FAADUMO WAXAY KA AXADHEY SHEEKADII MADIINA INAY SI AAD AH CARUURTEEDA U JECESHAHAY SIIBA MAXAMED OO AH LABADA FOOL EE HORE.

MADIINA INTAY CABAAR AAMUSTAY OO FEKERTEY. FAADUMO AYAA ARAGTAY ILMO INDHEHEEDA KA DA'AYSA OO INTAY NAXDAY KU TIDHI, "ALLA' MAXAA KU HELEY ?" MADIINA WAXAY TIDHI, "WAXAN XASUUSTAY MARKAAN ADIGA KU LE'EKAA EE AAN AHAA 18 JIRTA DHIBAATADII AAN KALA KULMAY UURKEYGII UGU HOREYEY, ILMIHII AAN DHALAYNA MARKIIBA WAA UU IGA DHINTAY. UMULISADII BAA II SHEEGTAY INUU AAD U YARAA". MADIINA WAXA AY KU SHALAYSAY HADDI AAN DA'DAA KA WEYNAAN LAHAA ILMO CAAFIMAAD QABA AYAAN DHALI LAHAA.

DHICISYADA DHASHA KUNKIIBA (1000)

HOOYOOYIN JIRA 20 SANO AMA KA YAR	X	X	X	X	X
	X	X	X	X	X
	X	X	X		
HOOYOOYIN JIRA 25–35 SANO	X	X	X		

UMAL–RAACA KUNKII HOOYO EE DHALABA

HOOYOOYIN JIRA 20 SANO AMA KA YAR	X	X	X	X	X
	X				
HOOYOOYIN JIRA 25–35 SANO	X				

HADABA WAXAANAY FAADUMO OGAYN, OO AY MADIINA OGAYD WAXAAY AHAYD: SOOMAALIYA HOOYOOYINKA YAR YAR (WAA WIXII LABAATAN KA HOOSEEYA), AYAA DHICIS BADAN KEENA WAAYO IYAGA AYAAN KORITAANKOODII DHAMAY-STIRNAYN, WAANA TAN UGU WACAN INAY UMUL RAACAAN. WAAYO WAXAANAY AWOOD U LAHAYN DHALMADA. U BISLAW GUURKA (GAADH 20 SANO). ILMO CAAFIMAAD QABA DHAL.



"HADDA, WAAN SUGAYAA SI AAN ILMA CAAFIMAAD QABA U DHALO", FAADUMO AYAA UGU JAWAABTEY MARKAY FAHANTAY WAXAY ISLAANTU U JEEDEY. MADIINA WEY KU FARAXDAY.

FAADUMO WAXAY JECLAYSATAY INAY UUR YEELATO LAAKIIN KHADRA OO MAXAMED WALAASHII AH AYANA KULA TALISAY INAY XOOGAA SUGAAN UURKA HORE SABABTOO AH, ILMAHA SOO SOCDA OO U BAAHAN: XOOL, DHAR, QOL U GAAR AH, IWM.

M.C.H.YADAADA AYAA KAA CAAWINAAYA SI AAD U SUGTID EE LA XIDHIIDH.

DARYEELKA CAAFIMAADKA
HOOYADA & DHALLAANKA

Waxaa lagu daabacay X.W.D.W. 1983